



The Presidency
Office of the President

SHARCI LR. 45

TAARIIKH: 30/03/2021

ANSIXINTA WAX-KA-BEDDALKA SHARCIGA WAXBARASHADA HEERKA 1AAD, 2AAD IYO
TACLIINTA SARE

MADAXWEYNAHA J.F.S,

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "T" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/358/2/B-10/20 taariikh
08/02/2021 kuna saabsan ansixinta Ansixinta Wax-Ka-Beddalka Sharciga
Waxbarashada Heerka 1aad, 2aad Iyo Tacliinta Sare

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:


Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday
Ansixinta Wax-Ka-Beddalka Sharciga Waxbarashada Heerka 1aad, 2aad Iyo Tacliinta Sare

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga
ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 30/03/2021


Madaxweynaha J. F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"



Somali Federal Republic
The House of the People
Office of the Speaker

Ref: CSH/358/2/B-10/20 الرقم:

Mogadishu, February 8, 2021 التاريخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ujeedo: Soo Gudbinta Wax-kabadelka Sharciga Waxbarashada Heerka 1aad, 2aad
iyo Tacliinta Sare.

Mudane Madaxweyne,

Sida aad la socoto, Wax-kabadelka Sharciga Waxbarashada Heerka 1aad, 2aad iyo Tacliinta Sare ee halkaan ku lifaaqan waxa soo gudbisay Wasaarada waxbarashada XFS.

Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talogaly marsiiyay Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada ee Golaha Shacabka. Ugu dambayna Hindise Sharciyeedka Waxbarashada Heerka 1aad, 2aad iyo Tacliinta Sare ayaa Golaha Shacabku ansixiyey Kalfadhiga 8aad Kulankiisa 11aad ee 31/08/2020, iyadoo ay goobjoog yihiin Boqol Todobaatan (170) Xildhibaan, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

Oggol: 170;

Diiday: 0;

Ka aamustay: 0;

M.ne Madaxweyne, maadaama Aqalkii sare uu Doorasho ku maqanyahay, waxaan si waafaqsan qodobka 90aad xarafka (q) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaliya kaaga codsanayaa inaad go'aanka Golaha ku ogolaato xeer Madaxweyne, si loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawlada.

Naga guddoon salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Maxamed Mursal Sheekh Cabdiraxmaan
Guddoomiyaha Golaha Shacabka BJFS

Og: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Guddiga Horumarinta Adeegga Bulshada.

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka

Tell: +252612224442 / +252-615577472


E-mail: speaker@parliament.gov.so

Website: www.parliament.gov.so

ANSAXINTA WAX-KABADELKA SHARCIGA WAXBARASHADA
HEERKA 1AAD,2AAD IYO TACLIINTA SARE.

Guddoomiye Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS

Tirada Xubnaha Codeysay 170: Oggol: 170; Diiday: 0; Aamustay: 0;




Saxiix: M. ne Mohamed Mursal Sheikh Abdirahmaan



Taariikh: February 8,2021

Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS




Saxiix: M. ne Abdiweli Sh. Ibrahim Muudey




Taariikh: February 8,2021


Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS



Saxiixa: Mudane Mahad Cabdala Cawad



Taariikh: February 8,2021



SHARCIGA WAXBARASHADA JAMHUURIYADA FEDERAALKA SOMALIA

SHARCIGA WAXBARASHADA HEERKA 1AAD, HEERKA 2AAD IYO TACLIINTASARE

JUL 30, 2017

www.moesomalia.net

QEYBTA KOOWAAD

**SHARCIGA WAXBARASHADA GUUD
(HEERKA 1AAD IYO HEERKA 2AAD)**

**SHARCIGANIWAXAALAGUDHISAY“SHARCILAMBAR6,TAARIIKH12FEB.1987,SHARCIGA
WAXBARASHADAGUUDEEJAMHUURIYADDADIMOQARAADIGASOOMAALIYA”.**

HORDHAC

Waxbarashadu waxa qasaasii hoouu aadanu huleeyahay, waxay nadaruuri tahay dhinacyada kaladuwaneekordhiyahor markasida, ladaga allanka faqriga, kobcinta dhaqaalaha, dowlad wanaagga iyo dimoqraadiyadda.

Dib uhabaynta hannaanka sharciga waxbarashada dalku waxay qayb ka tahay hawlaha muhiimkaa hee lagadoonayoinay dawladdu ku hagtodalkatubtadibudhiskaiyohor marka, sareuqaadiddatayadawaxbarashada heerarkeedakaladuwaniiyoguudahaanla-dagaallanka jahliga. Haddabawaxaalagamama armaanahin Waxbarashadu ayyeelatosiyaasadcadiyo sharcilagunidaamiyohabsamiusocodkawaxbarashadadalkaiyomaamulkeeda.

Hiigsiga fog ee laga leeyahay waxbarashada dalka waa sidii lagu gaari lahaa “Nidaam waxbarashoohorseedawadajirummadeed, wadaniyad, cadaalad, nabadiyohorumarwaaara”.

Silooxaqii jiyohiigsiga foga ee waxbarashada waxa muhiim ah inay jirto ahimil saxah, taasina waainlahela “Wasaarada woodlehooshaqeyneyso, lehnamaamul wanaagsaniyoshuruuc hagaysa, Manhaj mideysaniyo adeeg waxbarashoohufanoolahelikarooloonasimanyahay”.

Waxbarashadu waxay ubaahantahay qorshe iyo istaraatiijiyad toosan oo kusaabsan sidii loo horumarin lahaa. Sidaas daraadeed, Wasaaradda Waxbarashada, Hiddahaiyo Tacliinta Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya markay aragtay qodobbada 30aad iyo 31aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxay soosaaraysaa Sharcigan oo noqon doono midkiixeerin lahaa habkawa waxbarashada dalka Soomaaliya, kaasoo dammaanad qaada yaaxaqa uleeyahay qofkastoo Soomaalishii uu helo waxbarasho tayolehoo heerarka kaladuwan leh, waxa kaloo ufaahfaahinaya abartilmaameedkawa waxbarashada heer qaran, mid gobol iyo tan dagmooyinkaba iyo waliba habka loo gudbinayo adeegga waxbarashada iyo natii jadalaga filayoinay kasoo baxdo.

Waxaan rajaynaa in uu sharciganga cankageysandoon sidii dib loogu soo celin lahaa hantidii Wasaaradda Waxbarashada, Hiddahaiyo Tacliinta Sare oo waqtigan xaadirka ah loo isticmaalodanogaarah, waxa kaloo uu sharcigani waxkataridoonaatayadawaxbarashada iyo Jaamacadaha. dugsiyada

Wabillaahi Towfiq

CUTUBKA 1AAD: QODOBADAGUUD

Qodobka1aad:FasiraaddaEreyada

Markasharciganlagahadlayo,erayadahooskuqoranmidwalibawaxaauleeyahaymicnaha ku hor qoran:

1. **"Jinsiga"**Waxaaloolajeedaragiyohaweenlabadaba
2. **"Dugsi"**Waagobloodiyaariyayinwaxlagubartokunahabbooninlagufuliyo,dugsi wuxuunoqonkaraamidowladeedamamidgaarlooleeyahay,waxaakaluunoqon karaahalfasalamafasallobadanooykujiraanxarumahaguur-guura/Wareega, dugsiyadaquraankaiyoxarumahawaxbarshadaaqoondersiga.
3. **"Heerwaxbarasho"**Waxaaloolajeedaamuddowaxbarashoosannadoxaddidanleh.
4. **"Dalka"**WaadhulkaayleedahayJumhuuriyaddaFederaalkaeeSoomaaliya
5. **"Dugsiyadasareeefarsamaa"**Waxarumowaxbarashofarsamooheerdugsisareah muddada wax lagu bartaana ay noqon karto saddex ilaa afar sano.
6. **"Dugsiyadasareeexirfadaha(skills)"**Waxarumowaxbarashoxirfadeedoheerdugsi sare ah, muddada wax lagu bartaa ay noqon karto laba ilaa saddex sano.
7. **SharcigaWaxbarashada:**Waanidaamsookoobaya,islamarkaanaqexayahawlaha Waxbarashadalaxiriira,kanilaalinaayainayiskahoryimaadaanamaaykabaxaan jidkaloojeexayookudhisanshuruucdaiyoxeerarkadalka.
8. **"Maamule"**Waaqoflooxilsaarayinuudugsimaamuloamakusimomaamulaha
9. **"Macallin"**Waabareamabarbaariyesi**nidaamka**waxugadhigadugsiyadadalkaee waxbarashada heerarkeeda kaladuwan.
10. **"ManhajkaQaranka"**WaanidaamiyosiyaasadloodajiyayWaxbarashadadalka
11. **"Mu'asasadWaxbarasho"**Wahay'adWaxbarashooaanayDowladdulahayn
12. **"Waalid"**WaaHooyadaiyoAabbahaardaygadhalayamamidkood,amaqofkastaoosoo koriyey ama sifo kale oo sharci ah uga mas'uul ah ardayga.
13. **"Wasaaradda"**WaaWasaaraddaWaxbarashada,HiddahaiyoTacliintaSare
14. **"Wasiirka"**WawasiirkaWasaaraddaWaxbarashada,HiddahaiyoTacliintaSare
15. **"WaxbarashadaHoose-Dhexe"**Wawaxbarashadaheerkakoowaadookabillaabata fasalkakoowaadilaafasalkasiddeedaadloogunatalagaykobcintaaqoontaardayda da'dooduudhexeyso6jirillaa15jir
16. **"WaxbarashadaGuud"**WawaxbarashadaHoose-Dhexeiyodudsigasareookakooban waxbarashada**heerarkeeda**koowaad iyo heerka labaad ee **fasallada1-12aad**
17. **"Waxbarashadatooskaah"**Wawaxbarashoxiriirsanoookudhisannidaamka heerarka Waxbarashada sida heerka koowaad, labaad iyo saddexaad
18. **"Waxbarashadadadban"**WawaxbarashonidaamsanoookaduwanWaxbarashada tooska ah

19. **"Waxbarashadabaahidagaarkaah"**WaaWaxbarasholoogutalagalayardaydaayku adagtahaywaxbarashadaamakahaersarreeyafacooda,waxaanakamidahdadka naafadaahjirahaanamamaskaxahaanamalabadaba/amaayhibadiisuaadusarayso
20. **"WaxbarashadaGaarkalooleeyahay"**WaaWaxbarashonidaamsan,manhajahaaniyo maamul ahaanba ***ayna mas'uul ka yihiin***mu'asasado amadallado Waxbarasho oooaanay DowladdulahaynoosisharciahugadiiwaangashanWasaaradda
21. **"Dalladwaxbarasho"**Waamu'asasadowaxbarashoooisutegayooaanaydowladdu Lahayn.
22. **"Imtixaankashahaadigaah"**Waaimtixaankaugudambayaeeeloogugudboheerka labaad ama heerkasaddexaad.
23. ***"JFS" waa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.***
24. ***Qof" waa qofka caadiga ah amase qof shaqsiyad sharciyeed leh sid shirkad, hay'ad, iwm.***

QODOBKA 2AAD: MABAADI'DAGUUDEE WAXBARASHADA QARANKA

Siloo habeyonidaamka, iyo qaab-dhismeedka waxbarashada, waainladowromabaadi'da soo socota:

- Dhaqan-gelintasiyaasad waxbarasho, manhajiyo qaabkii loogu dhibinayey oomida yasan;
- U daadejinta awoodahamaamulee waxbarashada goobahaadeegyada waxbarasho iyo maamulkadowlad ahagobollada, iyada oo iscad loogu kala qeexayowaa jibaadkaiyo mas'uuliyadaha;
- Dejintahal-beeg waxbarasho iyo dhaqangelinta qaablaguxaqiijinayotayada heerarka waxbarasho iyo qaybeheedaba;
- Heliddaadeeg waxbarasho oo loo simanyahaysiloo helodadlehtayoiyowaxsoosaar oo isku dheellitiran;
- Siintatabarrojoogtoaheeshaqaalaha iyo macallimiintawaxbarashada sikorloogu qaado heerkooda aqooneed iyo kan xirfadeed;
- Hanashadaiyogacan-kuhayntahantikastoomaguurtoahowasaaradduleedahay;
- ***Dhisidda iyo horumarinta iskaashi ay Wasaaraddu la yeelato qoysaska ardada waxbarata, maamullada xarumaha waxbarashada diinta, maamullada xarumaha waxbarashada, ganacsatada iyo bulshada guud ahaanba;***
- Taabbogalintaxaqamuwaadinkastauleeyahayinuuhelowaxbarasholacagla'aanahilaaiyodugsigasare sidakuxusanqodobka 30aadee Dastuurka KMG ee JFS
- Inlahirgaliyo aragtiyada iyo howlahanabadgalyada ee bulshadadhexdeeda

Qodobka 3aad: Xuquuqda Waxbarashada

Wasaaradu waxay hirgalinaysaa istaraatejiyadda waxbarashada lacag la'aanta ah si loo helowaxbarasho loo dhan yahay loona siman yahay.

Qodobka 4aad: Ujeedooyinka Guud ee Waxbarashada Qaranka

Waxbarashadu waalaf-dhabarkaawoodeedeeqaranku ukugaarika rohumardhaqaalemid siyaasadeed iyo bulsheedoowaara. Haddaba, iyadoogarwaaqsan dowladumuhimadda asaasiga ah, waxay tiirraruga dhigeysaa Waxbarashada dalka ujeedooyinka soo socda:

1. Inlakobciyofahamkaiyo aragtidakusalaysan Diinta Islaamka, xoojintaxiriirkadunida Muslimka iyo caalamka intiisa kale.
2. Inlacirib-tirowaxqorid-akhrisla'aantalanadhiirrigeliyowaxbarashadadadka waaweyn.
3. Inladhisobulshokusaleysanqiimahadhaqankasuubaniyowaddaniyadda, ilaalinta sharciga, sinnaan bulsho iyo midnimada qaranka Soomaaliyeed.
4. Inladhiirrigeliyousinnaantafursadahaoodhan, iyadoolaogaanayolaganahor leexinayocaqabadahakahor-imaankarahorumarka qofkaiyobulshadaguudahaanba.

5. ***In la hormariyo aqoonta farsamada iyo hab-dhaqanka loo baahan yahay si dib loogu dhiso dalka, horumarka dunidana lala heer noqdo.***
6. Inlailaaliyoolahorumariyodeegaankadabiicigaahsiisagaooqedqabaloo dhaxalsiiyo jilalka mustaqbalka.
7. In***ardada***lagudhiirrigeliyodareenwaddaninimoiyonabaddaooxilgaarahlaiska saaro iyo wanaajinta xiriirka dadka, haddii ay noqoto bulshada, ummaddaiyo caalamkaba.

Qodobka 5aad: Awoodaha Wasaaradda

Xilalka iyo Waajibaadka Wasaaradda Waxaa ka mid ah:

1. Dejinta,horumarintaadeeggaiyodhaqangalintaSiyaasaddaWaxbarashada***qaranka***.
2. Dejinta,dhaqangalintaiyohorumarintaManaahijtaWaxbarashada***qaranka***.
3. Dhiirrigalintaiyokoruqaadiddawaxbarashadadadkawaawayn.
4. Dejintaiyomeelmarinta***imtixaannada shahaadada*** lagu qato.
5. HirgalintaWaxbrashadaBaahidaGaarkaahceardaydataageeradaubaahan
6. DejintaShuruucdaWaxbarashadaDugsiyadaDawladdaiyokuwagaarkalooleeyahay
7. XoojintaXiriirkaiyolaxisaabtankaHay'adahaWaxbarashada.
8. Xoojintaxiriirkawaxbarashadadawladdaiyotangaarkalooleeyahay
9. Horumarinta Waxbrashadareermiyiga
10. HorumarintawaxQorista,Akhriskaiyobarashada xisaabta
11. Koruqaadiddatiradaiyotayadawaxbarashoayusimanyihiingabdhahaiyowiilasha
12. Dhiirrigalintaiyohorumarintahiddaha,dhaqanka,fankaiyosuugaantasuubbane***ummadda*** Soomaaliyeed

CUTUBKA 2AAD: NIDAAMKA WAXBARASHADA

Qodobka 6aad: Waxbarashada

Nidaamka waxbarasho eeJamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa ay ka kooban tahay middowladeed iyo mid gaar ah.

Qodobka 7aad: Qeybaha Waxbarashada

Qeybaha Waxbarashada dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waa:-

1. Waxbarashada tooskaah
2. ***Waxbarashada dadka waaweyn.***

Qodobka 8aad: Heerarka Waxbarashada tooska ah

Heerarka Waxbarashada tooska ahi waxaa ay u kala baxaan sidan:-

1. Dugsiyada Qur'aankaiyo Xannaanada Carruurta
2. Heerkakoobaad: Waxbarashada Hoose-Dhexe (fasalka 1 aad ilaa fasalka 8aad)
3. Heerka labaad: Dugsiyada Sare
4. Heerka Sadexaad: Tacliinta Sare

Qodobka 9aad: Ujeeddooyinka Dugsiyada Qur'aanka

Ujeeddooyinka Dugsiyada Qur'aanka waa in carruurta:

1. *La baro Qur'aanka Kariimka ah, akhris ahaan iyo faham ahaan laguna ababiyo jacaylka iyo ku dhaqanka Diinta Islaamka.*
2. Labarohigga adda Luqadda Carabga
3. Lagubarbaariyo anshaxaiyo asluub tawanaagsan
4. Lagubarbaariyo jaceylkawaalidka, *ixtiraamka* macallimiinta iyodariska
5. Lagubarbaariyo ladhaqanka *la dhaqanka wanaagsan ee da'diisa.*

Qodobka 10aad : Ujeeddooyinka Dugsiyada xannaanada carruurta

Dugsiyada xannaanada carruurta waxaa loogu talo galay carruurta da'doodu tahay 3-6 sano jir, ujeeddooyinka laga leeyahayna waa in:

1. Labaro aasaaska Islaamka laguna barbaariyo jaceylkaku *dhaqanka* diinta Islaamka
2. Lagubarbaariyo anshaxawanaagsan sidamaamuuska, naxariista, saaxiibtinimada, nabad gelyada iyo daryeelka hantida
3. Lagadhisa axaggajirka, maskax daiyoshuurtoodaba
4. Lagudhiirrigeliyo halabuurka, ladhaqanka faaciisaiyo jaceylkaddadkiisaiyodalkiisa
5. Labaro akhriskaiyo qoritaanka *higgaadda* xarfahaiyotirada

Qodobka 11aad: Lahaanshaha iyo maamulka Xaarumaha Xannaanada Carruurta.

1. *Lahaanshaha, qalabeynta iyo maamulka xaarumaha xannaanada carruurta waxaa yeelan kara Dawladda amase qofkii kale oo ay Dawladdu u oggolaato.*
2. Xannaanada carruurta waxaa ka mas'uul ah maamulkooda, dhismohooda iyo qalabeyntooda baddaleh, iyada oo ay Dawladdu siineysodaryeeliyokormeer. Warqadda oggolaanshahawaxaalaga qaadanayaa Wasaaradda Waxbarashadda, Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

Qodobka 12aad: Ujeeddooyinka Waxbarashada heerka kowaa

Waxbarashada heerka koowaad waa aasaaska waxbarashada dalka, ujeeddooyinkeeduna waa:

1. Ku-barbaarinta ardeyda barashada iyo ku-dhaqanka Diinta Islaamka;
2. Ku-barbaarinta anshaxa wanaagsan iyo waddaniyadda;
3. Waxay ka dhistaa ardayga dhinaca dhismaha jirka, maskaxda iyo shakhsiyaddaba;
4. Waxay u-suurtagalisaa ardayga aasaaska aqooneed iyo mid xirfadeedba oo u sahleysa inuu sii wato waxbarashada heerka labaad.

Qodobka 13aad : Xaq iyo Muddada Waxbarashada Heerka Koowaad

1. Muddada waxbarashada heerka koowaad waa siddeed sano oo ka billaabaneysa sandka koowaad, kuna eg kan siddeedaad.
2. Waxbarashada heerka koowaad waa xaq ay u siman yihiin ardeyda gabdho iyo wiilal gaaray da' dugsiyeedka.

Qodobka 14aad: Khidmadaha Waxbarashada

Khidmadaha laga qaado waxbarashada dalka waa sida soo socota:

1. Waxbarashada heerka koowaad oo ka kooban dugsiyada Hoose-Dhexe ee Dawladda waa lacag la'aan;
2. *Waxbarashada heerka koowaad oo ka kooban dugsiyada Hoose-Dhexe ee gaarka loo leeyahay, waxay noqon kartaa mid lacag ah amase mid deeq ah;*

Qodobka 15aad : Da'da Qoritaanka Dugsiyada Hoose-Dhexe

1. Carruurtaagaartay 6sano waxaawajib ahin dugsiyadugudhowlagadiiwaan galiyosiyawaxbarashada Hoose-Dhexeubilaabaan.
2. Da'da carruurta gaartay lix sano waxaa laga xaqiijinayaa xaashida dhalasha, go'aan takhtareedamase guddi-dugsiyeedka;

Qodobka 16aad: Ujeeddooyinka Waxbarashada HeerkaLabaad

Waxbarashada heerka labaad waxay bixisaa noocyo aqooneed oo kala duwan, ujeeddooyinkeeduna waa iney soo saarto arday:

1. Aaminsan kuna dhaqma Diinta Islaamka iyo dhaqanka suubban;
2. Leh anshaxwanaagsan, waddaniyad iyo biseyl aqooneed, una hoggaansama xeerarka dalka;

3. Ka dhisan aasaaska culuumta sayniska, xisaabaadkaiyo teknooloojiyada;
4. Leh aqoon xirfadeed oo caalamka horumaray la heer ah, taasoo awood u siineysa kor-u-qaadidda tayada noloshiisa iyo tan bulshada;
5. Leh hal-abuur, fikir, ra'yi madaxbannaan iyo fahmad sare;
6. Leh aqoon uu ku sii wadan karo tacliin sare.

Qodobka 17aad: Muddooyinka iyo Noocyada Waxbarashada Heerka Labaad

Waxbarashada heerka labaad waxaa ay u qaybsan tahay:

1. Dugsiyada Sare ee caadiga oo muddada wax lagu barto ay tahay afar sano;
2. Machadyada Diinta Islaamka oo muddada wax lagu barto ay noqon karto saddex ilaa afar sano
3. Dugsiyada Sare ee Farsamada oo muddada wax lagu barto ay noqon karto saddex ilaa afar sano;
4. *Dugsiyada Sare ee Xirfadaha oo muddada wax lagu barto ay noqon karto labo ilaa saddex sano.*

Qodobka 18aad: Qoritaanka iyo Dhigashada Waxbarashada heerka Labaad

1. Qoritaanka iyo dhigashada waxbarashada heerka labaad waxaa loo oggolyahayahay oo qura: Ardayda soo dhammeysatay waxbarashada heerka koowaad;
2. Dadka waaweyn ee ku guuleysta shahaadada imtixaanka loogu gudbayo waxbarashada heerka labaad;
3. Habraaca iyo nidaamka Waxbarashada Heerka Labaad waxaa lagu soo saarayaa Xeer u gaar ah.

CUTUBKA 3AAD : MANHAJKA WAXBARASHADA

Qodobka 19aad: Manhaj Waxbarasho

Heer kasta oo waxbarasho waa inuu lahaado qorshe iyo manhaj waxbarasho oo ka turjamaya ujeeddooyinka waxbarashada ee JFS.

Qodobka 20aad: Qorshaha Manhajka Waxbarashada

- 1) Ujeeddooyinka guud ee waxbarashada JFS ee Sharcigan ku cad;
- 2) Ujeeddooyinka gaarka u ah maaddo kasta iyo heer kasta oo waxbarasho, kuwaasoo loo habeeyay maaddo-maaddo iyo fasal-fasal;
- 3) Hababka wax-baridda iyo barashada;
- 4) Qalabka waxbarashada;
- 5) Muddada waxbarashadu soconeyso iyo jadwalka waxbarashada;
- 6) Diyaarinta warbixin la xiriirta qaabka qiimeynta, hirgelinta manhajka iyo horumarka ardeyga.

Qodobka 21aad: Guddiga Qaran ee Manaahijta Waxbarashada

Waa Guddi Qaran ee manaahijta Waxbarashada JFS, kana mas'uul ah allifaadda iyo qorista manaahijta iyo daabacaadiisa. Xubnaha uu ka koobmayo, qaabdhismeedkiisa, xilalkiisa iyo waajibadkiisa, muddo xileedkiisa shuruuradaha lagu soo xulayo iyo meelaha ay ka imaanayaan waxaa Xeer Nidaamiye ku soo saaraya Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare.

Qodobka 22aad: Maaddooyinka Waxbarashada

Maaddooyinka lagu baranayo dugsiyada dalka heerarkooda kala duwan waxaa lagu soo saari doonaa xeer-nidaamiye uu soo saaro Wasiirka, waxaana waajib ah in:

1. Dugisyada waxbarashada ee dalka oo dhan laga dhigo maaddooyinka Diinta Islaamka;
2. Waxaawaajib ah inlagudhigodugsiyadadalkaoo dhan maaddooyinkaDiintaIslaamka,Af-SoomaaligaiyoAf-Carabiga
3. Maaddo kastana waa iney yeelataa buug amase buugag saldhig u ah manhajka iyo buugag tilmaame-bare ah.

Qodobka 23aad: Afafka Waxbarashada

Afafka wax lagu barto ee dugsiyada Hoose-Dhexe (1-8aad) iyo Sare waxay noqonayaan sida soo socota:

1. Ardada dugsiyada Hoose-Dhexe (1-8aad) waxay wax ku baranayaan Af-Soomaali;
2. Luqada Afka Ingiriiska ah oo maaddo ahaan loo qaadanayo, heerkeeduna kala sarreeyo waxaa lagu billaabayaa ardada fasalka 3aad;
3. Ardada Dugsiyada Sare waxay wax ku baranayaan luqadaha Soomaaliga, Ingiriiska amase Carabiga;
4. Waxabarashada heerka koowaad 1aada ee dugsiyada dalka waxaa lagu bixin karaa luqado kale, haddii:
 - a) la raacay manhajkii Wasaaraddu ansixisay kaddibna oggolaasho laga helo Wasiirka;
 - b) maddooyinka Af-Soomaaliga, Carabiga iyo Tarbiyada Islaamka la barayo ardada;
 - c) laga soo billaabo dhammaan fasallada dugsiyada xannaanada haddii maaddada luqada Carabiga oo heerkeedu sarreeyo iyo barashada Diinta Islaamka lagu barayo Af-Carabi;
 - d) cilmiga bulshada oo barashadiisu ay tahay waajib lagu barayo Af-Soomaali dhammaan ardada fasallada oo dhan

Qodobka 24aad: Tarbiyeenta Waxbarashada Manhajka Ka Baxsan

Manhajka rasmiga ee dugsiyada dalka waxaa lagu xoojinayaa tarbiyeenta waxbarashada manhajka ka baxsan oo loogu talo galay in ay ardeyda ka dhisto dhinacyada jirka, ruuxa, maskaxda, dhaqanka, anshaxaiyo asluubtaba, sida:

1. Tixgelinta xuquuqda aadanaha, is-ixтираamka, la-dhaqanka bulshada, fahmada iyo fursadaha kala duwan ee aasaaska u ah horumarka noloshada;
2. Kobcinta hiwaayadaha kala duwan ee wax ku oolka ah sida, farshaxanka, hal-abuurka, ciyaaraha, suugaanta, hiddaha iyo dhaqanka;
3. Xirfadaha wax-soo-saarka ee ku jaan go'an da'da ardeyda iyo aqoontooda.

CUTUBKA 4AAD: MACALLINKA

Qodobka 25aad: Shuruudaha Xulashada Macallimiinta Dugsiyada Hoose-Dhexe iyo Kuwasare

Waxaamacallinno qonkara qof buuxiyay shuruudahasoo socda

1. Waa in uu leeyahy aqoon gaareysa amase u dhiganta heerka tacliinta sare ee dalka;
2. Waa in uu Soo qaatay tababar macallinnimo oo aan ka yareyn labo sano (2), haystaanna rukhsad macallinnimo oo ay Wasaaraddu aqoonsantahay;
3. Waa in uusan lahayn balwad waxyeelo u geysan karta dhimirkiisa, caafimaadkiisa, shaqadiisa iyo go'aan qaadashadiisa amase sumcadda uu ku leeyahay bulshada dhexdeeda;
4. Waa in uu leeyahay dhimir **fiyoow**, , akhlaaq wanaagsan iyo dulqaad, uusan galin dembi ciqaabeed ay Maxkamadi ku xukuntay.

Qodobka 26aad: Waajibaadka Macallinka

Waajibaadka macallinka waa sida soo socota:

1. Waxbaridda iyo barbaarinta ardeyda;
2. Fulinta manhajka dugsiyada;
3. Qiimeynta waxbarashada ardeyda;
4. Talosoo jeedin manhajka waxbarashada;
5. Ka-qaybgalka nashaadyada dugsiga iyo ilaalinta nabadgelyada ardeyda inta ay joogaan Dugsiga. Inuu si siman oo caddaalad ah u tixgeliyo dhammaan ardeyda.

Qodob27aad:ShaqaaaleyntaMacallinka

Shaqo-qoridda macallinka iyo xuquuqihiisa dhaqaale waxaa lagu maamulayaa Xeeridaamiye uu soo saaro oo aan khilaafsaneyn sharciga shaqaalaha rayidka ah ee Dawladda Soomaaliyeed.

CUTUBKA 5AAD:MAAMULKA DUGSIYADA

Qodobka 28 aad: Aasaas Dugsi

Dugsiwaagoobkuhabboon in lagu fuliyowaxbarashonidaamsan oolehtilmaamahan:

1. Dugsiwaxaalagu aasaasikaraaugu yaraan25arday iyomeelkuhaboonWaxbarasho.
2. Faahfaahintaqodobka27aad
iyohabraacahindisaha,dismahadugsiga,maamulkiisaiyoqolalka
waxbarashada waxaalagu sharxidoonaaxeernidaamiyeuuwasiirku soo saaro.

Qodobka 29 aad: Xiritaanka Dugsiga

Dugsiwaxaa laxiri karaahaddii uubuuxin waayoshuruudaha kuxusanqodobka27 iyoxeernidaamiyeyaashalaxiriiraceudegganWasaaradda.

Qodobka 30aad: Dhisme Dugsi

Qaabka hindisahiyo dhismaha qolalka Waxbarashada waxa axaddi dayanida amka Dhismaha Dugsiyada iyo talooyinkaka soobaxa Wasaaradda, iyada oo latixgelayo duruufaha kaladuwan ee deegaanada dalka.

Qodobka 31aad: Maamul Dugsi

1. Dugsikasta waainu yeeshaa qaab maamulo tilmaamay hoggaaminta, mas'uuliyadaha iyohubintahowlahadugsi.
2. Dugsikasta oo buuxiya shuruudaha aasaasiga ahee dugsiyada waainu yeeshaa maamule cayiman.
3. Faahfaahinta qaabkamaamulka dugsiiyo waajibaadka maamul ah waxa lagu soosaaray xeer nidaamiyegaarah.

Qodobka 32aad: Shuruudaha Magacaabidda Maamule Dugsi

Maamule dugsi waxaa lagu magaaci karaa qof:

1. Haysto ugu yaraan shahaado Jaamacadeed;
2. buuxiyay shuruudaha macallinnimo ee ku xusan qodobkay 24aad ee Sharcigan;
3. in uu ku soo shaqeyay xilka Maamule-Xigeen ugu yaraan hal sano;
4. Inuu leeyaha khibrad macallinnimo oo aan ka yareyn shan (5) sano;
5. Inuu dhimirkiisa fiyoowyahay;
6. Inuu leeyahay karti hoggaamineed oo muuqata;
7. In uu Leeyahay asluub wanaagsan;
8. In uusan Lahayn balwado wax u dhimaya caafimaadkiisa, dhimirkiisa iyo sharafkiisaba;

Qodobka 33aad: Guddiga Waalidiinta Dugsiga

Dugsi kastaa waxaa uu yeelanayaa guddi waalid oo ka koobnaan kara rag iyo haween, kuwaas oo xubnooda iyo dawrkooda lagu faahfaahin doono Xeer Nidaamiye uu soo saaro Wasiirku.

Qodobka 34aad: laahnshaha Masu'uuliyadda Dugsiyada

Masu'uuliyadda maamulka, dhismaha iyo qalabeynta dugsiyada Hoose-Dhexe waxay noqoneysaa sida soo socota:

1. Dugsiyada Waxbarashada Hoose-Dhexe ee gaarka loo leeyahay waxaa maamulkooda, dhismohooda iyo qalabeyntoodaba ka mas'uul ah cidda leh, iyada oo ay Dowladdu ku sameyneyso kormeer iyo qiimeyn joogto ah
2. Dugsiyada Waxbarashada Hoose-Dhexe ee Dowladda waxaa dhismohooda, qalabeyntooda iyo maamulkooda bakamas'uulah Dowlad-goboleed

Qodobka 35aad: Maamulka Guddoonka Waxbarashada ee Heer Gobol iyo Degmo

Hoggaaminta howlaha Waxbarashada gobollada iyo degmooyinka waxaa ka mas'uul ah Wasaaradaha Waxbarashada ee dawlad goboleedyada iyaga oo raacaya sharcigan iyo xeer nidaamiyayaasha la xiriira..

Qodobka 36aad: Anshaxa Goobta Waxbarashada

1. Waxaa ka reebban macallimiinta iyo maamulka dugsiga in ay ardayga u geystaan falal wax u dhimi kara jirkiisa, naftiisa, maskaxdiisa ama shakhsiyaddiisa iyo sharaftiisa
2. Faahfaahinta qodobkani wuxuu ku soobixi doonaaxeernidaamiyeuu soosaaro Wasiirku

CUTUBKA 6AAD: WAXBARASHADA DADBAN

Qodobka 37aad: Waxbarashada Dadban

Waxbarashada dadban waa waxbarasho nidaamsan oo loogu talo-galay dadka waaweyn ee ay da'doodu ka weyn tahay 18 (sideed & toban) jir.

Qodobka 38aad: Ujeedooyinka Waxbarashada Dadban

Waxbarashada dadban waa in:

1. Ardaygkadhista afahamkaxuquuda Aadanaha, anshaxa iyo dhaqanka suuban ee Islaamka.
2. Ay ardaygusuurtagelisa akoruqaadidda awooddisaaqoonneed, farsamo, xirfadeed iyo kordhinta awooddiisa wax soo saar dhaqaale
3. Aysiisaa ardayga awoodu kusii wadankaro Waxbarashadiisa
4. Aynoqotomidku habboon dadka lasiinayowaanain loo eega hadbasidaloogu baahan yahay xagga horumarinta bulshada, dhaqaalaha iyo dhaqanka

Qodobka 39aad: Noocyada Waxbarashada Dadban

Waxbarashada dadban waxay ka koobnaankartaa qeybaha socda:

1. Barashada diinta Islaamka iyo ku dhaqankeeda.
2. Barashada akhriska, qorista iyo xisaabta
3. Waxbarasho guud oo ka sarreysa akhris-qorista oo heerar kala duwan leh
4. Barasho xirfado iyo farsamooyin kala duwan oo wax ku ool ah

Qodobka 40aad: Mas'uuliyadda Waxbarashada dadban

1. Dejinta siyaasadda guud iyo barnaamijyada waxbarashad dadban
2. Dhiirrigelinta faafinta waxbarashada dadban iyadoo la kaashaneysa Wasaaradahaay khusayso, Hay'adaha Madaxabannaan iyo Dawlad-goboleedyada.
3. Barashada xirfadaha kala duwan ee waxbarashada dadban waxaa fulin kara Wasaaradda, hey'adaha dowladda iyo kuwa sida gaarka ah loo leeyahey iyadoo la raacayosiyaasadda Wasaaraddamarwalba.

Qodobka 41aad: Waxbarashada Haweenka

Wasaaradda waxay ahmiyad gaar ah siineysaa waxbarashada haweenka si la mid ah tan loogu talo galay tan ragga, waxayna qaadeysaa tallaabooyinka soo socda:

1. Sameynta istraatejiyad iyo qorsheyaal cad oo kor loogu qaadayo waxbarashada **haweenka**;
2. Iney sanad walba qoondo gaar ah siiso tiro gabdho ah oo loo tababaro iney noqdaan macallimiin.

CUTUBKA 7AAD: DUGSIYADA GAARKA LOO LEEYAHEY

Qodobka 42aad: Ujeedooyinka Dugsiyada gaarka loo leeyahay

Waxbarashada sida gaarka ah loo leeyehay waa wabarasho nidaamsan oo ay bixiyaan hay'ado ama dallado waxbarasho, oo si sharci ah uga diiwaan gashan Wasaaradda. Noocyada, heerarka, manhajka iyo afafka Waxbarashada gaarka loo leeyahay waxay la mid yihiin kuwa dugsiyada dowladda ee ku xusan qodobbada 7, 8, 19 iyo 22.

ujeeddooyinkeeduna waa:

1. Kordhinta fursadaha waxbarasho ee dalka;
2. Ka qaybqaadashada kor u qaadista tayada waxbarashada dalka;
3. Xoojinta tartanka loogu jiro baahinta waxbarista.

Qodobka 43aad: Shuruudaha Aqoonsiga Dugsiyada Gaarka loo leeyahay

1. Dugsiyadagaarkaahwaxaayeelankaramu'asasadWaxbarshoamadalladWaxbarasho,oo si sharci ah udiiwaangashan.
2. Mu'asasadWaxbarashowaxaasisharciahloodiiwaan gelinkaraamarkaayfulisoshuruudahawasaaradduudejisayWaxbarashadagaarkalooleeyahay.
3. Dugsiyadagaarkalooleeyahaywaxaalaqaoonsankaraa:
 - a. Kadibmarkaaywasaaradduansixisogooobtaiyoqaabkadhismeeddugsiga,qalabkiisa,iyomaamulkiisa.
 - b. Haddiiayleedahaymu'asadoosisharci ahu diiwaangashan.
 - c. KadibmarkalakeenoqorshewaafaqsanmanhajkadowladaJFS.
 - d. Kadibmarka la keenocaddayninla hayomacallimiiniskudheelitirankuna filanbaahidadugsigaooobuuxiyayshuruudaha xulashadamacallinka eeqodobka 24aadeesharcigan
 - e. Caddaynawoodhantiyeed oosuurogelineysafulintahowlahawaxbarashadadugsiga
 - f. Caddeyn/haynmaamulbuuxiyashuruudahaloogabaahanyahaymaamulkiisaiyomacallimiintiisa
 - g. Tifaftirkaqodobkanwaxaa uuku soobixi doonaaxeernidaamiyeuu soosaarowasiirku

Qodobka 44aad: Guddi Waalid

Dugsikastaoolagubixiyowaxbarashogaar looleeyahaywaainuuyeeshaaguddi waalidoowaaliddiintu iska soo dhex doorteen, kana kooban haween iyo rag.

Qodobka 45aad: kaalinta wazaaradda ee Dugsiyada Gaarka loo Leeyahay

Sharcisiinta,qiimeynta,kormeerka iyo tayodhowridda,dhaqangalintamanhajka,qaadiddaimtixaankashahaadigaah iyoshahaado siintaardayda waxkabaradadugsiyadagaarkalooleeyahaywaxaamas'uulka ah wasaaradda.

Qodobka 46aad: xiritaan dugsi gaar ah

Wasaaradduwaxayawooduleedahayinaymu'asasadWaxbarashokaxirtodugsigiifulinwaayashuruudihii lagu aqoonsadaydugsigaas.

Cutubka 9aad: Waxbarashada Ardeyda Baahida Gaarka ah Qabta**Qodobka 47aad: daboolista Waxbarashada Ardada Baahida Gaarka Ah Qabta**

Ardaydabaahiyaha gaarkaah leh waa inay helaan Waxbarashokusaleysan baahidooda iyo awooddooda, laguna dadaalo in lagaarsiyo heer ay isku filnaadaan.

Qodobka 48aad: Fulinta Waxbarashada Baahida Gaarka ah

Barnaamijyada lagu horumarinayo Waxbarashada baahidagaarkaah waxa awadajirufulin ay wasaaradda, hey'ada haqarankaiyo ku wamadaxabannaaneekushaqadalehdaryeel kabulshada (eegerey bixinta).

Qodobka 49aad: Shaqaalaha Fuliya Waxbarashada Ardeyda Baahida Gaarka ah Qabta

Xarun kasta oo lagu fuliyo waxbarashada ardeyda baahida gaarka ah qabta waa iney leedahay macallim in leh aqoonta iyo tababaridda lagama maarmaanka u ah ardeydaas, ayna yaallaan qalab ku habboon in lagu fuliyo waxbarashadaas iyo haddii loo baahdo shaqaale caafimaad.

Qodobka 50aad: Kormeerkaiyo Qiimeynta**Waxbarashada Baahida Gaarka ah**

Wasaaradda ayaa guud ahaan u xilsaar xiriirinta, kormeerkaiyo qiimeynta barnaamijyada Waxbarashada baahid a gaarka ah.

CUTUBKA 9AAD: QIIMEYNTA WAXBARASHADA DALKA**Qodobka 51aad: Qiimeynta Waxbarashada Dalka**

Wasaaradda ayaa kamas' uul ah qiimeynta Waxbarashada dalka heerarkeedakoowaad (Hoose/Dhexe), labaad (dugsigasare) iyo Sedexaad (jaamacad) (Mid Dowladeed iyo mid gaar looleeyahayba) iyoshaarsiintamacaallimiinta..

Qodobka 52aad: Qiimeynta sannadlaha ah

Sannad dugsigasare kastawaa in ardayda Waxbarashadooda la qiimeeyaa ugu yaraan labo jeer, ladii waangeliyaa, lakeydiyaa, lana ogeysiya ardaydaiyo waalidkoodbanatijada qiimeynta.

Qodobka 53aad: Imtixaanka Shahaadiga

Arday kastaa oodhameystalabada heerey Waxbarasho (Hoose-Dhexe iyo Dugsigasare), waanu u fariistaa imtixaankashahaadiga ah ee Dowladda.

Qodobka 54aad: Xafiiska Imtixaanaadka

Wasaaradda Waxbarashadu waa inay lahaataa Xafiiska Imtixaanaadka Qaranka. Faahfaahinta qodobka waxay ku soobixidoonta xeer nidaamiye u soo saar wasiirku..

Qodobka 55aad: Golaha Imtixaanaadka Waxbarashada

Golaha Imtixaanaadka, waa Gole Qaran oo maamulo Imtixaanaadka Shahaadiga ah (Fasalka 8aad iyo Fasalka 12aad), Dejintiisa, Sixiddiisa iyo Shaacintiisa, Xubnaha uu ka koobmayo, Shuruuradaha lagu soo xulayo, meelaha ay ka imaanayaan iyo kaalinta ay ku yeelanayaan Dowlad Goboleedyada, waxaa Xeer Nidaamiye ku soo saaraya Wasiirka Wasaaradda Waxbarashada, Hiddaha iyo Tacliinta Sare J.F.S

Qodobka 56aad: Muddada iyo Saacadaha Sannad Dugsiyeedka

1. Mudada waxbarashada sannad dugsiyeedku waa 36 todobaad oo waxbarid ah.
2. Saacadaha waxbarashada sannad dugsiyeedka heerka 1aad kama yaraan karaan 1008 (kun iyo siddeed) saacadood oo Waxbarasho ah.
3. Saacadaha waxbarashada sannad dugsiyeedka heerka 2aad kama yaraan karaan 1134 (kun, boqol iyo sodon iyo afar) saacadood oo Waxbarasho ah.

CUTUBKA 10AAD: DHULKAIYODHISMAHADUGSIYADADOWLADDA

Qodobka 57aad: Hantidama-guurtadaah, Dhulkaiyo Dhismaha

1. Hantidama-guurtadaah, dhulka bannaaniyo Dhismaha Dugsiyadada wadaahantigu udooda dadweyne waxaa ka mas'uul ah wasaaradda si gaar ahna looguma takri fali karo.
2. Hantidama-guurtadaah, Dhulkaiyodhismahadugsiyadalamaiibinkaro, lamakirayn karo lama bixin/hibeynkaro, lamawareejinkaro, sigaarahaaneednaloomaisticmaalikaro.

CUTUBKA 11AAD GUDDIGA WAXBARASHADA, CILMIGA IYO DHAQANKA

Qodobka 58aad: Guddiga

Wasaaradda waxay dhiseysaa Guddiga Waxbarashada, Cilmiga iyo Dhaqanka Soomaaliyeed.

Qodobka 59aad: Dhismaha Guddiga

Ujeedooyinka iyo qaab-dhismeedka Guddiga Waxbarashada, Cilmiga iyo Dhaqanka waxaa lagu soo saari doonaa Xeer Nidaamiye uu soo saaro Wasiirka.

CUTUBKA 12AAD: SHARCIGAN TAABBA-GALINTIISA IYO TIXRAACIISA

Qodobka 60aad: Dawlad goboleedyada Federaalka ah

Dawlad gobaleedyada Federaalka ah ee Soomaaliya waxay sameysan karaan xeer-hoosaadyowaxbarasho oo iyaga u gaar ah kaas oo waafaqsan sharcigan.

Qodobka 61aad: Dhaqangelintasharciga Waxbarashada Dalka

Dhaqangelintasharciga Waxbarashada Dalka waxaa kamaas'uulah Wasaaradda

Qodobka 62aad: Nuqulka Soomaaligu waa marjic

Nuqulka soomaaliga ah ayaa asal u noqonaya sharcigan

Qodobka 63aad: Gacan sarreyn

Sharci kasta oo khuseeya arrimaha Waxbarashada, kana hor imaanaya sharcigaan waa wax kama jiraan.

Qodobka 64aad: Burin

Waxaa la burriyay xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin sharcigan.

Qodobka 65aad: Dhaqan-galin

Sharcigan waxaa uu dhaqan galayaa marka ansixiyo ee lagu soo saaro faafinta rasmiga ah ee dawladda.

QEYBTA LABAAD

**SHARCIGA TACLIINTA
SARE(HEERKA 3AAD)**

**UTUBKA 13AAD: QODOBADA
GUUDQODOBKA 66AAD: FASIRAADA
ERAYADA**

Erayada hoos ku qoran, waxa aasharcigan dhexdiisaloolajeeda afasiraad amid walbaku hor qoran:

1. **Hay'ad Tacliin Sare:** Waxa aaloolajeeda ahay'ad waxbarshoobixisawaxbarasho heerka saddexaad oo ah waxbaris macilmibaariskas arraysawaxbarashad adugsigasare.
2. **Guddigatacliintasare:** Waxa aaloolajeeda Guddiga Tacliinta Sare ee Soomaaliyeed oo masuulka ah habsami-usocodkaiyokatalobixinta Tacliinta Sare ee Dalka Soomaaliya.
3. **Jaamacad:** Waxa aaloolajeeda ahay'ad waxbarshoobixisa Tacliinta heerka 3aad oo ka sarraysat adugsigasare, bixisana ugu yaraanshaha adad aderejadakowaad (1aad).
4. **Mac'had:** Waxa aaloolajeeda ahay'ad tacliinsare oo bixisa diploma ama shahaadoka hoosaysa darajada kowaad ee jaamacadda.
5. **Guddoomiye:** waxa aaloolajeeda aqoofka agusareeya jaamacadda.
6. **Guddiga sare ee Jaamacadaha Dowladda:** Waxa aaloolajeeda guddiudhisansidaku tilmaaman qodobka 4aad ee sharcigan uuna ugu sareeyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
7. **Shahaado:** Waxa aaloolajeeda acaddeyn marqaati-kacahoolagubixiyowaxbarsho qorshaysano muddox addidan laguqaatay.
8. **Ruqsad:** Waxa aaloolajeeda aawarqadoggolaansho ah oo sisharcigan waa faqsan loosiyo hay'ad bixisatacliintasare oo soo buuxisaysu huruudihiiyomustawihii loogabaahnaa
9. **Xeerarka Jaamacadda:** Waxa aaloolajeeda aasharcihoosaadka ay jaamacad leedahay, kaasoo khuseeya waxbarashada iyo maamulka
10. **Shahaadad adarajadakowaad:** Waxa aaloolajeeda acaddeyn lasiiyomarkauuqofku dhamaysto wabarasho jaamacadeed darajadeeda 1aad.
11. **Waax:** Waxa aaloolajeeda qaybka tirsankulliyadda oo howl mucayanahqabaneysa
12. **Aqoondersi:** waxa aaloolajeeda aawaxbarasho aan fool-ka-foolahayn
13. **Hormuud:** Waa madaxa kulliyadda oo si waafaqsan xeerka Jaamacadda loogu magcaabay jagadaas.
14. **Guddiga Jaamacadda:** Waxa aaloolajeeda Guddiga jaamacadda leedahay oo loogu talagalay in ay ka shaqeeyaan maamulida iyo howl gelinta jaamacadda.
15. **Guddiga Sare ee Jaamacadda/Mac'hadka:** Waxa aaloolajeeda Guddiga agusareeya ee maamula jaamacadda/machadka.
16. **Macallin Jaamacadeed:** Waxa aaloolajeeda baresaree waxkadhig ahay'ad tacliinsare si joogto ah ama si aanjoogto ahayn.
17. **Takhasuska Sare:** Waa aqoon waxbarasho oo ka sareysa darajada 1aad ee waxbarashada tacliintasare.

QODOBKA 67.AAD: UJEEEDADA SHARCIGA

Ujeedooyinka Sharcigaani waa sida soo socda:

1. Horumarintanidaamkalagumaamulayohay'adahatacliintasare,
2. Midayntashahaadooyinkaamaxirfadahaiskumidkaahiyosidookale, mideynta shuruudaha lagu qiimeynaayo maaddooyinka isku midka ah ama isku-dhow ee ay bixiyaan hay'adaha kala duwan ee tacliinta sare.
3. Xurmayntamadaxbannaanidaiyoxorriyaddahay'adahasiloofududeeyo,lootayeeyo, loona baahiyo tacliintasare.
4. Nidaaminta,hagidda,aasaasiddaiyomaamuliddahay'adahabixiyaatacliintasare..
5. Dhiirigelinta,sareuqaadida,cilmibarista,halabuurkaiyo farshaxankasiwaafaqsan qoodobka 30aad faqradiisa 5aad ee dastuurka ku meelgaarka ah.
6. Horumarinta,baahintaiyofidintawaxbarashadasareeeJamhuuriyadda.
7. HabayentaiyodejintasiyaasddatacliintasareeeJamhuuriyadda

QODOBKA 68.AAD: MABAADI'DA GUUD

Siloohabeeyonidaamka,iyoqaab-dhismeedkawaxbarashadatacliintasare,waainladhowro mabaadi'da soo socota:

1. Dhaqan-gelintasiyaasadwaxbarashookusaleysansharciganoohay'adahaTacliinta Sare u siman yihiin.
2. Dejinta hal-beeg waxbarasho iyo dhaqan gelinta qaab lagu xaqiijinayotayada JaamacadahaiyoTacliintaSareqeybeheedakaladuwan;
3. Dhisidda iskaashi qaabeysan oo lala yeesho ururrada bulshada, ganacsatada, hay'adaha tacliintasareeadduunka,kuwacilmibaaristaiyokuwadowladdaeegacansaarkala leh TacliintaSare.
4. Taabbo-galintaxaqamuwaadinkastauleeyahayinuusiawatowaxbarashotacliinsare oo tayo leh, hadii uu awoodo.

CUTUBKA 15.AAD: DHISMAHA GUDIGA TACLIINTA SARE

QODOBKA 69AAD: SHAKHSIYADA QAANUUNIGA AH EE GUDDIGA

1. Guddiguwuxuuleeyahayshakhsiyadqaanuuneedooukusaxiixikaroheshiisyo,siuuu fuliyoarimahalagamamaarmaankauahhabsamiusocodkahowlahatacliintasareee dalka si waafaqsansharcigan.
2. Gudiguwuxuuawooduleeyahayinmagaciisa:
 - a. Lagudacweynkaroasnauwaxkudacweynkaro.
 - b. Lagu deyminkaro

- c. Hanti ku kasbankaro.
3. Inuu shaabbad samaysankaro.

QODOBKA 70.AAD: QAAB-DHISMEEDKA GUDDIGGA

GuddigatacliintasareeeSoomaaliyeedwuxuukakoobanyahaysagaal(9)xubnoodoo laga soo xulayo bahwadaagta waxbarashada. Shuruudaha, habraaca, waajibaadka iyo awoodaha; sidookale, dhismahaguddihoosaadyada, guddoonka guddigaiyo meelaha xubnahaguddiguaykaimaanayaanwaxaykusoo bixidoonaanxeernidaamiyeusoo saarowasiirku.

CUTUBKA 16.AAD: HAY'ADAHA TACLIINTA SARE

QODOBKA 71.AAD: QAYBAHA AY KA KOOBAN YIHIIN HAY'ADAHA TACLIINTA SARE

Noocyada hay'adaha tacliinta sare waa sida soo socota:

1. Jaamacad amaMac'haddowladeed.
2. JaamacadamaMac'hadgaarlooleeyahay.
3. Xaruncilimibaaris(Akaadeemiyad)dowladeed
4. Xaruncilmibaaris(Akaadeemiyad)gaarlooleeyahay.

QODOBKA 72.AAD: WAAJIBAADKA HAY'ADAHA TACLIINTA SARE

Sharcigan wuxuu hay'adaha tacliinta sare awood u siinayaa:

1. Bixinta shahaado sare ee heerarka kala duwan ee tacliinta sare marka la hubiyo in ardaygu buuxiyey shuruudihii looga baahnaa
2. Kalanoqoshadashahaadokastao labixiyeyhaddiiayxaqiiqowdoinshahaadadaaslagu kasbaday si aan sharciga waafaqsaneyn.
3. Gudbintaaqoontatacliintasare,horumarintacilmi-baaristaiyosareuqaadidatayada waxbarashada.
4. Faafintaaqoontaiyofursadsiiintadadkadoonayainaytacliintasarehelaan,iyadaoo tixgelingaarahasiiinayohaweenkaiyodadkabaahidagaarkaahqaba.
5. Magacaabistaguddihawleedyougaarahiyagooraacayaxeerarkooda.
6. Abaabuliddakulamoiyodood-cilmiyeedyomadaxbannaankuwaasoodhowraya shuruucdadalka,qiyamkaIslaamka,anshaxaiyodhaqankasuubaneummadda Soomaaliyeed
7. Waxayxiriirwaxwadaqabsiiyoiskaashiooankaahorimaaneyninshuruucda waxbarashada dalka la samaysan karaan:
 - I. Jaamacado amamacaahidkale
 - II. Hay'adowaxbarashoiyururowaxbarashadakashaqeeya

III. Xarumo cilmibaariseed

QTUBKA 17.AAD: DHISMAHA JAAMACADAHA

QODOBKA 73.AAD: HABRAACA LAGU DHISAYO JAAMACADAHA DOWLADDA

Siloodhisajaamacaddowladeed,waxawaajibahinlaraacohabraacaan:

1. Dhisitaankajaamacadaydowladduleedaheywaainlagusaleeyaadaraasadcilmiyesaniyobaahixaqiiqaah. Habraacalagudhisayojaamacaddowladeed wuxuu kusoobixidoonaaxeer nidaamiyeugaarahouuwasiirkusoo saaro.

QODOBKA 74.AAD: HABRAACA LAGU DHISAYO JAAMACADAHA GAARKA LOO LEEYAHAY

1. Dalka waxaa laga furi karaa jaamacado gaar loo leeyahay si waafaqsan qodobka 30aad faaqradiisa 4aad ee Dastuurka.JFS
2. Jaamacadaha gaarka loo leeyahay waa in ay leeyihiin madaxbanaani iyo jiritaan sharci ah oo Dastuuri ah.
3. Aasaasidda Jaamacadaha gaarka loo leeyahey waan in lagu saleeyaa daraasad cilmiyeyan iyo baahi xaqiiqa ah.
4. Habraaca lagu dhisayo/unkaayo jaamacadaha gaarka loo leeyahey wuxuu ku soo bixi doonaa xeer nidaamiye u gaar ah oo wasiirku soo saaro
- 5.

QODOBKA 75.AAD: SHURUUDAHA DIIWAAN GELINTA

Wasaaraduwaxaydiiwaangelinkartaajaamacadahagaarkalooleeyahaymarkauucodsaduhubuuxiyo shuruudahaansoosocda:

1. Barnaamijwaxbarashooowaafaqsanujeeddooyinkaiyoistiraatiijiyada guudeetacliintasareedalka.
2. Goobwaxbarashokuhaboon, buuxisayna shuruudahaqiimeyntaJaamacadahadalka.
3. Uguyaraanafarkulliyadoodoo lehafartakhasus
4. Dhaqaale ku filanjaamacaddamuddo halsano ah.
5. Soogudbintaliiska barayaal leh takhasus sareoolaxiriirabarnaamijka Jaamacadda.

QODOBKA 76.AAD: RUQSAD SIIN KU MEEL GAAR AH

1. Jaamacadwaxaaruruqsadkumeelgaarahlasiinkaraamarkaaysoodhamaystirtoshuruudihidiwaangelinta sidaku cad qodobka10aadeesharcigan.
2. Ruqsaddakumeelgaarkaahwaaybureysaahadiijaamacadduaysoodhammeystiriweysowaxyaabihiila garabayamalaogaadayin aysoo gudbiseyxogkhaldan.Burrintunawaa inayahaataa midqoraalahoosababaysan.

QODOBKA 77.AAD: Diiwaangelin

Jaamacaddumarkaysibuuxdaa gudatowaajibbaadka uufarayo sharcigan kanasoo gudubtoqiimaynta

tayadatacliinta saremudo3sanogudohoodahwaxaala siinayaa ruqsaddhamaystiran.

CUTUBKA 18.AAD:MAAMULKAHAY'ADAHATACLIINTASARE

Qodobka78.aad:Qaabd-HismeedkaHay'adahaTaclintaSare

1. Waainhay'adkastookashaqeydatacliinsareleedahayqaabdhismeedkasosocda:
 - b) Guddi sare oo Jaamacadeed (Board of trustee)
 - t) GuddigaKulliyadaha
2. Habraaca Xubnaha guddiga sare ee jaamacadda, shuruudahooda, waajibaadkaiyo awoodaha;sidookale,guddoonkaguddigasareejaamacaddawaxaykusoobixi doonaanxeernidaamiyeuusooaarowasiirku.

Cutubka19.aad:Tayo-Ilaalinta Hay'adahaTaclintaSare

Qodobka79.aad:KaalintaDowladdaEeXaqiijintaTayada

1. Wasaaradda ayaa ka masuul ah qaabka lagu xaqiijinayo tayada iyo jaangoyntahalbeegyadatacliintasare.
2. Habraacatayodhowrkawuxuuku soobixidoonaa xeernidaamiyeuu soosaaro wasiirka

Qodobka80.aad:KaalintaJaamacadahaGaarkaLooLeeyaha EeIlaalintaTayadooda

1. Hay'ad kasta waa in ay leedahay habraac lagu xaqiijinayo tayada tacliinta sare oo ay bixineyso, taasoo ku qeexan xeer-hoosaadyadeeda, waafaqsanna Sharciga iyo Xeer-nidamiyeyaasha la xiriira.
2. Hay'adkasta oobixsa tacliinsare waa inay si gaar u buuxisaa shuruudahan:
 - I. In ay leedahaymuqarrar(syllabus)cayimanoosannadle ahInayiskudheellitiran yihiinsaacadahauuardaygucasharkaqaadanayoio saacadahalooqoondeeyayinmaadadalagudhameeyo.
 - II. In cashar kasta uu ku dheellitiran yahay maaddada uu ku saabsan yahay, marka laga eego dhinacyada cilmi-baarista iyo tijaabinta.
- IV. Inuu cadyahayqaabkii loohorumarin lahaamacallimiintajaamacadda
 - v. Inuujiro urardadamatala.
 - vi. In heerka aqoonta bareyaasha uusan ka hooseynin Master Degree.
 - vii. Faahfahinta qodobkan wuxuu ku soobixidoonaa xeernidaamiyeuusooaarowasiirku

Qodobka81.aad:AqbalaaddaArdaydaU Gudbeysa TaclintaSare

1. MuwaadinkastaooSoomaaliyeedoodoonayainuu u gudbowaxbarashadaheerkasaddexaad, buuxiyaynaShuruudahaloobaahanyahay, haystanashahaadd odugsisareoolaaqoonsanyahay, wuxuu xaq u leeyahayin loo oggolaado Jaamacadahadalka.
2. Ardayda jaamacaddaha dowladda galaysa oo hibooyinka gaarka leh sida ciyaaraha, muusikada, iyo hiwaayadaha kale ee wax ku oolka ah, waa in tixgalin loo sameeyo si loo dhiiragaliyo
3. Aqbalaadda jaamacadaha dowladda waxaa lagu saleyneyaa baahida waxbarasho ee jirta iyo shaqalahaloo bahanyahay.

Qodobka82.aad:TayadaAqooneedEeMadaxdaHay'adahaTaclintaSare

1. MadaxdaHay'adaha bixiya TacliintaSare waxaa laguxirayaasifooyiniyotayo aqooneedoogaarah. Sifooyinkaiyoheerkaa qooneedeelagadoonayowaxaykusoobixi doontaaxeernidaamiyeuusoosarowasiirku

Qodobka83.aad:AdeegyadaLagaDoonayoHay'adahaTaclintaSare

Hay'ad waliba oo bixisa tacliin sare waxaa looga baahan yahay shuruudahan:

1. Fasallowaafaqsan nidaamkaudegsan habraaca loo dhiso waxbarshada tacliinta sare.
2. Maktabaddhexe oosicasih u qalabeysan, laganahelikaroaddegyadaay ardayduuga baahanyihiinduruustoodaiyocilmibaarista.
3. Kuliyadahacilmigaahwaainayleeyihiinshaybaarocasriahoolasocdateknolijiyada cusuboo ardaydaloo gusameeyotusmooyinka, tababarrada, tijaabooyinkaiyocilmi baarista.
4. Jaamacad/mac'had waliba waa in uu lahaadaa xarun IT oo casti ah oo ardayda u fududeysawaxbarashadaiyocilmibaarista.
5. Masaajid, garoommadaciyaaraha iyomaqaayad.

UTUBKA 20.AAD: DEEQAHA WAXBARASHO

QODOBKA 84.AAD: MAAMULIDDA DEEQAHA WAXBARSHO

1. Wasaaraddaayaamas'uurkaahndaaminta iyomaamuliddadeeqahawaxbarsho

QODOBKA 85.AAD: SHURUUDAHA BIXINTA DEEQAHA WAXBARSHO

Arday kasta oo doonayo inuu helo deeq waxbarsho waa inuu:

1. Kasoobaxaydugsi sarekunagudbeynatijjo loo baahan yahay .
2. Haystana warqadda asluub wanaagga
3. Haystaa qiimeynta iyo tasdiiqidda ay Wasaaraddu siisay shahaadadiisa, haddii uu ardaygukasoobaxeydugsisareewaddankadebaddiisaah.
4. Kuguuleystoimtixaankaogolaanshahadeeqdawaxbarashada.

QODOBKA 86.AAD: WAAJIBAADKA SHAQAALAHA DEEQ WAXBARSHO LA SIIYEY

1. Ardayga ama shaqaalahadeeqdawaxbarasholoodiraywaxaa laga rabaa in uu waxbarshada ku soo dhamaysto muddada loo asteeyay, ayadoo markasataba la tixgalinaayo wixii daruuf ah ee la soo gudboonaada
2. Ardeyda ama shaqaalahadeeqdawaxbarasholoodiraywaxaalagajoojinkaraadeeqdawaxbarasho ee la siiyey,haddii aykucaddaatoxaaladahasoosocda:
 - I. Inuu dembi ka galay dalka uu wax ka baranayay
 - II. Inuu sabab la'aan dib uga dhaco xilligii ay Wasaaraddu u qabatay inuu ku soo dhammeystirto deeqda waxbarasho
 - III. Inuu ku dhaco ama ay dhaafaan imtixaanaadka labo sano oo isku xigta
 - IV. Qofka shaqaalaha ee loo diro deeq waxbarasho waxaa laga joojinayaa fasax laacageedka waxbarashada haddii uu si ula kac ah u sameeyo arrimaha kor ku xusan

QODOBKA 87.AAD: BAAHINTA DEEQDA WAXBARSHO

1. Wasaaraddawaxaakuwaajib ah inayogeysiisodadweynaha,cadadkadeeq waxbarshoaheelagahelaydibadda,dalalkabixiyay,iyo mudadaaysocnaysodeeqdaas.

CUTUBKA 21.AAD: MAC'HADYADA FARSAMADA SARE
SAREQODOBKA 88.AAD: MAC'HADYADA FARSAMADA SARE

1. Machadyada farsamada sare waxaa geli kara ardeyda soo dhamaysatay dugsiyada sare, waxaana lagu nidaaminayaa si waafaqsan sharcigan iyadoo lagu maamulayo xeernidaamiye u gaar ah oo uu soo saaro Wasiirku

QODOBKA 89.AAD: MAC'HADKA TABABBARKA XIRFADAHA

Mac,hadyada tababarka xirfadaha waxaa lagu dhisayaa si wafaqsan sharcigan, waxaana lagu maamulayaa Xeernidaamiye u gaar ah oo uu soo saaro wasiirku

CUTUBKA 22.AAD: QODOBBADA QUBANAHA

QODOBKA 90.AAD: HAGIDDA SIYAASADDA EE WASIIRKA

Wasiirka wuxuu awood u leeyahay in uu:

1. Qaatogo'aankadhanahay'adahawaxbarashadatacliintasare,kuwa Dawladda iyo kuwa gaarkaloo leeyahay, haddiiay xaaladdeg degah timaaddo
2. Soo saarowareegtoku socotodhammaanahay'adahawaxbarashada tacliintasare, kuwa Dawladda iyo kuwa gaarkalooleeyahay, si loofuliyosiyaasaddatacliinta sare
3. Go'aanka gaararrimahadeg degaah oo uu GuddigaTacliintaSareeeSoomaaliyeedka tala bixinwaayaan

QODOBKA 91.AAD: HAY'ADDAHA KHILAAFA SHARCIGAN

1. Lagama furikarodalka Jaamacadama Machadsareiyadoo aan Wasaaradda lagahaysan oggolaanshorasmiahoowaafaqsansharcigan.
2. Ku-xad-gudubkaqodobkaanfaqradiisa1aad,waxaa lagu muteysan karaa ganaaxlacageed amaseciqaabkale.

QODOBKA 92.AAD: TAYADA IYO AQOONTA BARAYAASHA JAAMACADDAHA

Lama shaqaaleyn karo Bare Jaamacadeed oo aan soo buuxin shuruudaha u degsan Guddiga Tacliinta Sare ee Soomaaliyeed.

QODOBKA 93.AAD: BURINTA

Waxaala burriyeysharcikasta ooaanla socon karin sharcigan iyo Xeer-nidaamiye kasta oonaanwaafaqsanaynSharcigan.

QODOBKA 94.AAD: DHAQANGALKA SHARCIGA

Sharcigani wuxuudhaqangalayaamarkauubaarlamaankaansixiyo,uunasaxiixoMadexwenaynaJFS, lagunasoosaarofaafinta rasmigaah.

